

1.6.2021

Booliska Turku wuxuu baadhayaa dambiga doorashada ee Varissuo laga soo wargaliyey

Xarunta booliska ee Lounais-Suomi wargelinta la siiyey sida ay dhigayso waa magaaladda Turku xaafadda Varissuo in cadaadis lagu saaray cod bixiyayaasha in ay u codeeyaan musharixiinta qaarkood. Boolisku wuu baadhayaa arrinta.

Boolisku wakhtigan xaadirka ah warbixinta ay hayaan sida ay dhigayso culeyska waxaa loo saaray sida suurtoogalka ah saddex musharax oo kala duwan dartood. Dhammaan saddexdaa shaqsi waxay musharixiin ka yihiin golaha deegaanka ee Turku xeyndaabkeeda doorashada. Arrinta waxaa loo baadhayaa hordhac ahaan saddex dambi doorasho oo kala duduwan. Komishanka doorashada loogama shikisna wax dambi ah.

Boolisku waxay doonayaan in ay xusuusiyaan cod bixiyayaasha, in qof kasta oo codeynayaa uu xaq u leeyahay inuu codkiisa dhiibto, amaba uunan dhiibanin, xuquuqda codkiisana uu ugu codeynayo qaabka uu isagu doonayo. Hanjabaad ku saameynta qofka kale codkiisuna waa mabnuuc.

Boolisku waxay codsanayaan wixii tilmaan ah oo suurtoogal ah ee culeys saarid ah cinwaanka emaylkan vihjeet.lounais-suomi@poliisi.fi ama WhatsApp- iyo farriin telefoon ahaaneed lambarkan 050 411 7655.

Bilowga baadhitaanka dacwadu waa curdin weli, sidaas awgeed boolisku hadda marxaladan wax warbixin ah oo intaa ka badan kama bixinayaan arrintan.